



GRANT

Dugsiga Sare

2245 NE 36th Ave | Portland, OR 97212
(503) 916-5160 | www.pps.net/grant



Bulshada Grant waxaa ka go'an in ay kobciyaan deegaan loo dhan yahay. Grant waa dugsi sare oo dhamaystiran oo kala duwan oo firfircoon, wuxuuna leeyahay caadooyin taariikhi ah iyo sidoo kale u heellanaanta sahaminta tignoolajiyada cusub iyo caadooyinka ka tarjumaya adduunkeena isbedbeddelaya. Waxaan aaminsanahay marka ardayda muhiim yihiin, ardayda way guulaysan doonaan. Waxaana naga go'an sinnaanta waxbarashada anagoo ku dadaalnayna inaan hubino in ardaydeena ay u diyaar garoobeen nolosha, shaqada, iyo waxbarashada wixii ka dambeeya dugsiga sare. Si taas loo gaaro, Grant waxa uu bixiyaa fasalo kala duwan oo asaasi ah, barnaamijyo la doortay, koorsooyinka AP, koorsooyinka kuleejka dual-credit ah, koorsooyinka shaqada iyo waxbarashada farsamada iyo noocyo kala duwan oo hababka taageerada shucuureed bulsho ee dhammaan ardayda.

Iftiiminta Grant

Bulshooyinka Fasalka 9aad:

Dhammaan ardayda fasalka 9aad waxay ka tirsan yihiin bulsho wax baranaysa. Bulsho kasta waxa ku jira Farshaxanka Luuqadda, Fiisigiska NGSS, iyo Weydiinta (Inquiry) Fasalka 9aad. Intaa waxaa dheer, ardayda fasalka 9aad waxay qaataan koorasyo kale oo muhim ah waxayna ka doortaan noocyo kala duwan oo xulasho ah.

Koorsooyinka Meelaynta Sare waxaa ka mid ah:

Juqraafiga Aadanaha ee dhammaan ardayda fasalka 10aad, Bayoolaji, Kimistari, Fiisigiska, Calculus, Sayniska Deegaanka, Taariikhda Yurub, iyo Farshaxan Istudiye.

Koorsooyinka PSU, PCC, iyo OIT oo Dual Credit ah waxaa ka mid ah: Ceramics & Farshaxan, Suugaanta Afrikaan Ameerika, Dumarnimada & Daraasaadka Jinsiga, Suugaanta Latin Ameerika, Masraxa Sare, Tirakoobka, Anatomy iyo Physiology, Mabaadi'da Sayniska Biomedical, Faragelinta Caafimaadka, Xogta iyo Tirakoobka. GHS waxay ku faantaa fursadaheena Dual Credit ee la siiyo DHAMMAAN ardaydeena. Dhammaan ardayda dhigata fasallada 11aad iyo 12aad ee fasaladeena Ingiriisiga looga baahan yahay iyo koorsooyinka Bayoloji ee fasalka 11aad ee loo baahan yahay waxay haystaan fursad ay ku helaan buundooyinka kulliyadda PCC. Xaqiiqda Xiisa Leh: Sannadkii hore ardayda GHS waxay kaydsadeen in ka badan \$250,000 kaydka waxbarashada iyada oo loo marayo PCC oo keliya.

Grant waxa uu leeyahay majaladda arday ah oo ku guulaystay abaalmarino oo la yiraado Grant Magazine kaas oo hadda ku jira 12 sano oo shaqo ah. Qorayaasha majaladda waxay PSU ka heli karaan buundooyinka saxaafadda kuleejka. Waxay ku guuleysteen lix abaalmarin oo ka timid Ururka Saxafada Scholastic Columbia.

Bayaanka Hadafka

Bulshada Grant waxaa ka go'an in ay kobciyaan deegaan loo dhan yahay. Grant waa dugsi sare oo dhamaystiran oo kala duwan oo firfircoon, wuxuuna leeyahay caadooyin taariikhi ah iyo sidoo kale u heellanaanta sahaminta tignoolajiyada cusub iyo caadooyinka ka tarjumaya adduunkeena isbedbeddelaya. Waxaan aaminsanahay marka ardayda muhiim yihiin, ardayda way guulaysan doonaan. Waxaana naga go'an sinnaanta waxbarashada anagoo ku dadaalnayna inaan hubino in ardaydeena ay u diyaar garoobeen nolosha, shaqada, iyo waxbarashada wixii ka dambeeya dugsiga sare. Grant waxa uu bixiyaa fasalo kala duwan oo asaasi ah, koorsooyinka la doortay, koorsooyinka AP, koorsooyinka kuleejka dual-credit ah, koorsooyinka waxbarashada shaqada-farsamada





"Marka Ardayda Muhiim Yihiin, Ardayda Way Guulaysan Doonaan"

Kooxda Constitution-ka Grant ayaa ku guuleystay Nationals-ka afar jeer: 2013, 2015, 2018, iyo 2020, waxaana uu ku guuleystay tartanka gobolka Oregon 13 jeer tan iyo markii aan bilownay tartanka sannad dugsiyeedka 2000-2001.

Barnaamijyada Waxbarashada Farsamada Xirfadda waxay ardayda siiyaan fursadaha shaqo ee qarniga 21aad oo ay wax ku bartaan fasalka dhexdiisa. Ardaydu waxay bartaan xirfado farsamo oo ay weheliyaan macluumaadka ku saabsan shaqooyinka la xiriira mawduuca waxbarashada. Koorasyada qaarkood waxay bixiyaan buundooyinka kuleejka, hawlaha cilmi-baarista, layliyo, booqashooyinka goobaha shaqada iyo fursadaha kale ee isdhexgalka. Waxaan bixinaa barnaamijyo waxbarasho oo kala duwan oo CTE ah.

Barnaamijyadeena waxaa ka mid ah:

- Soo dhawaynta & Fanka Cunnada
- Naqshadeynta 3D & Farshaxanka
- Injineernimada Maqalka
- Maamulka Ganacsiga
- Sayniska Kombiyuutarka
- Alwaax ka shaqeeynta/Dhismaha
- Warbaahinta Dijital ah
- Injineernimada & Robotics
- Sayniska Caafimaadka
- Warbaahinta badan/Fanka Masraxa





Ciyaaraha & Hawlaha



Ciyaaraha 6A ee Tartanka ah: Baseball, Kubadda kolayga, Cheer, Orodka, Kooxda Qoob ka ciyaarka, Goolof, Kubadda cagta, Football, Softball, Dabaasha, Tennis, Track iyo Field, Kubadda laliska, iyo Legdanka.

Ciyaaraha Mideysan: Waxaan bixinaa seddex isboorti iyada oo loo marayo Olombikada Gaarka ah ee Oregon- Kubadda Cagta, Kubadda Koleyga, iyo Softball. Ciyaaraha Mideysan waa barnaamij isku dartaa tiro siman oo ciyaartooyda Olombikada Gaarka ah iyo la-hawlgalayaasha mideysan ee kooxaha isboortiga ee tababarka iyo tartanka.

Naadiyada: Grant waxa uu leeyahay in ka badan 100 naadi oo ku salaysan xiisaha ardayda, oo ay ku jiraan: Ururka Ardayda Madow, Ururka Ardayda Dadka asaliga ah, Naadiga Jasiiradaha Aasiya-Baasifigga ah, MEChA, National Honor Society, Kooxda Diyaarinta Kulliyada, Queer Straight Alliance, Ururka Ardayda Carabta/Barriga Dhexe, Naadiga Cadaaladda Cimilada, Naadiga Deegaanka, Naadiga Sinnaanta, Naadiga Kalluumeysiga, Naadiga Bagel, Lacrosse, Rugby, Rowing, Skiing, Snowboarding, Water Polo iyo kuwo kale oo badan.



Bandhigga iyo Farshaxanka Muuqaalka



- Kooxda Symphonic
- Jazz, Wind, iyo Percussion Ensembles
- Choirs-Treble Choir, Men's Ensemble, Acapella, Royal Blues
- Riwaayad iyo Masraxa Muusiga
- Qoob ka ciyaarka oo Bilowga, Dhexdhexaadka, iyo Sare ah
- Qorista Fanka
- Aasaaska Farshaxanka, Ceramics, iyo Daabacaadda
- Daabacaadda Shaashada
- Warbaahinta Dijital
- Naqshadeynta Dhismaha
- Sawir-qaadista
- Naqshad Sawireed
- Farshaxan Istuudiye
- Sare



Taageerada Ardayga



Xarunta Kulliyada iyo Shaqada ee Grant waxay la shaqeysaa Waaxda La-talinta si ay uga caawiso hagidda ardayda markay isu diyaarinayaan mustaqbalka. Iskuduwaha Xirfadda iyo mutadawiciinta waalidka ayaa ka shaqeeya xarunta soo gelista, waxayna bixiyaan macluumaadka ku saabsan shaqooyinka iyo waddooyinka si loo helo shaqooyinkaas. Xarunta Shaqada waxay bixisaa macluumaad ku saabsan kulliyadaha, jaamacadaha, layliyo iyo/ama barnaamijyada tababarka shaqada. Xarunta Shaqada waxay furan tahay maalin kasta, waxayna siisaa fursado ay kula kulmaan wakiilada kulliyadda ee booqda Grant sanadka oo dhan. Waxa kale oo jira fursado sannadka oo dhan ah oo loogu talagalay sahaminta shaqada - martida hadlaya, booqashooyinka shaqada, iyo layliyo.